

HAL NABAR XITAA WAA SAA'ID

Adiga ama elhelkaagu miyaad la kulanteen dagaalka qoyska dhexdiisa ah? Ciriiri nafsadda ah miyaad dareemaysaa, mase xanaaqsan tahay ama cabsanaysaa? Wakhtigan xaadirka ah miyaad ka fekereysaa waxa ay tahay inaad sameysi iyo ciddii aad caawimo weydiisan lahayd? Ma u baahan tahay caawimo, taageero iyo taloba? Ma rabtaa inaad dhibaatooyinka dagaalka ee aad la kulantay kala hadashid qof kuu sheega waxa ay tahay inaad samayso, oo leh wadne uu kugu dhegeysto, xaaladadana fahmaya? Haddii ay sidaas tahay, qoraalkan si taxader leh u akhri.

Waa maxay dagaalka labada qof ee xiriirka leh iyo kuwa elhelka ah?

Dagaalka labada qof ee xiriirka elhelku ka dhexeeyaa wuxuu noqon karaa dilliin jir ahaaneed, sida ruuxitaan, wax ku dhufasho iyo dagaal wasmo ahaan ah. Wuxuu kaloo noqon karaa cadaadis xagga nafsadda ah, sida caayitaan, af lagaadeyn, cabsi gelin iyo hanjabaad. Dagaalka elhelka isu dhowi wuxuu noqon karaa in qofka gurigiisa lagu soo xiro oo cunto la'aan iyo lacag la'aan la dhigo, guriga bannaankiisana laga go'doomiyo. Dagaalku wuxuu kaloo noqon karaa, in hantida la burburiyo ama dhaqaalaha awood cunaqabatay loo isticimaalo.

Nasiib daro dagaalku aad ayuu u badan yahay. Inta badanna qofka dagaalamaa waa nin. Wuxuuna noqon karaa qofka dagaalka lagu samaynayo ninkeeda ay isqabaan ama wada nool yihiin ama saaxiibka yihiin ama walaalkeed ama nin kale. Qofka dagaalka lagu sameeyaa inta badan waa qof dumar ah. Waana qofka dagaalka samaynaya xaaskiisa ama naag ay wada nool yihiin ama saaxiib yihiin ama walaashii ama hooyadii oo waayeel ah. Mar mar dhif ah waxaa dhici karta in qofka dagaalka wadaa uu yahay qof dumar ah.

Qofka dagaalka lagu sameeyo waxaa dhici karta inuu dagaalku u keeno dhibaatooyin waaweyn. Qofba qofkuu dagaallan la kulankiisu ka badan yahay dhaawacyada uu dagaalku ku reebaa way ka khatarsan yihiin – murugo, kaar, ciriiri xagga nafsadda ah dareen nabadjelyo la'aan ah iyo dareen rajo la'aan ah, silicsanaan, caro aanu muujinaynin, cillado dhibaatooyin xagga maskaxda ah, khalad u isticimaalka waxyaabaha mukhaadaraadka ah iwm.

Mar walbase rajo waa jirtaa. dagaalka joogtada ah xitaa waa laga gudbi karaa. Dad badan ayaa ka baxay dagaalka uu ku hayey qofka ay xiriirka lahaayeen. Qofka dagaalka wadeyna waxaa suurowdey inuu ka qaybqaato barnaamijka daryeelida oo uu kaga fekerey dagaalankiisii, uuna gaarey go'aan ah inuu dagaalka joojiyo. Intaa ka dib sal caafimaad iyo nabadjelyo leh ayaa loo helaa, si uu xiriirkii u sii socdo.

Sida uu dagaalku u badan yahay

Sida ay qabto cilmibaaris ay Hay'adda Tirakoobku soo bandhigtay sannadkii 1998 boqolkiiiba 40 dumarka Finnishka ka mid ah ayaa la kulmay dagaal jir ahaaneed ama wasmo ahaaneed ama hanjabaad oo uu nin u geystey. Shantii dumar ah ee cilmibaarista ka qaybqaatayba mid ka mid ah ayaa waxay sheegtay, inay dhibaato dagaal jir ahaaneed kala kulantay ninka ay hadda xiriirka wada leeyihiin. Sannadkii cilmibaarista ka horeeyey gudihiisa 90 000 oo dumar ah ayaa jir uu nin ku sameeyey la kulmay.

Dagaalka qoyska dhexdiisu ilmaha xitaa dhibaato ayuu u geystaa

Ddilliinka hooyada lagu sameeyaa wuxuu kordhinayaa khatarta suuragalka ah ee uu ilmuuhokin dilliin isaga lagu sameeyo la kulmi karo. Ilmaha xitaa waxaa la isticimaalaa marka cadaadiska hooyada lagu samaynayo. Iska horimaadyada dagaallada ahi waxay waxyeello u geystaan ilmaha. Waxaa laga yaabaa inuu ilmuuhu guduhiisa ku qarsado dhaawacyada ay u geystaan oohinta hooyada iyo qaylada iyo dagaalka aabbuhu. Gaar ahaan ilmaha gurigooda kula kulmay dagaalka ayaa waxay u badan tahay inay noqdaan kuwa la dilo iyo kuwa wax dila. Mase aha inay sidaa noqoto, sababtoo ah dagaalkan wareegaya waa la awoodaa in la joojiyo.

Ma jiraan wax qofka xaq u siinaya inuu dagaal isticimaalo

Ma jiraan wax ay tahay inay sabab u noqdaan dagaalamidda. Furiin qofka foodda ku soo haya, masayr, cabsida ah in qofka loo muujiyo inaan la rabin, diidmo xagga wasmada ah, nolosha carruurnimada oo adkayd, xaalad dhaqaale ama guriga oo cirii ah, qofna xaq uma siinayaan inuu wax dilo. Xitaa hal nabar oo qof lagu dhuftaa waa saa'id.

Dagaalku waa dembi

Xeerilaliyuu dacwo ayuu ku soo oogi karaa dagaalada guriga dhexdiisa ka dhaca, xitaa haddii qofka dilka lagu sameeyey aanu wax dacwo ah samayn ama aanu dalban in qofka dagaalka sameeyey la ciqaabo. Dagaalada ka dhaca meelaha barayfitka ah iyo kuwa ka dhaca meelaha bulshada ka dhexeeyaba waa dembiyo hoos taga xeerilaaliyaha guud. Dagaalka waa in booliska loo sheegaa.

Sharciga mabnuucidda u soo dhawaanshada (lähestymiskielto) wuxuu dhaqan galay sannadkii 1999 bilowgiisii. Ujeeddada sharcigu waa, in laga hortago dembiyada lana kordhiyo fursadaha wax lagaga qaban karo qashqashaadida khatarta ah iyo hanjabaadda dagaalka. Qofka lagu xukumay mabnuucidda u soo dhawaanshada lama kulmi karo lana soo xiriiri karo qofka la badbaadinayo. Mana daba geli karo oo kor kama ilaashan karo qofkan la badbaadinayo. Mabnuucidda u soo dhawaanshada waxaa laga dalbadaa ama booliska ama si toos ah aaya looga dalbadaa maxakamadda degmada (kärajäoikeus). Qofkan dagaalka sameeyey ama hanjabey waxaa lagu xukumi karaa, in aanu joogjoogin meelaha qaar, tusaale ahaan qofkan la badbaadinayo gurigiisa ama goobta uu ka shaqeeyo iyo agagaarkooda. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mabnuucidda u soo dhawaanshada waxaa laga heli karaa cinwaanka internetka ee ah www.polisi.fi

In lagu caawiyo dalbo

Dagaalku iskiis isagama dhammaado. Sidaas sarteed qofka dagaalka lagu sameeyey waxay tahay inuu dalbado, in la caawiyo. Xitaa haddii dagaalku aanu ahayn mid maalin walba joogto ah, cabsidiisu waxay noqon kartaa joogto. Haddii aan dagaalka soo noqnoqonaya aan la joojin, wuxuu isu beddeli karaa mid sidii hore ka axmaqsan oo sidii hore si ka badan u soo noqnoqda.

Qofka dagaalka lagu sameeyo iyo kan dagaalka sameeyaaba waxay heli karaan caawimo. La xiriir oo arrinta kala hadal dadka caawiyayaalka ah ee arrimahan ku takhasusay. Waxaadna ka wada fekereysaan nooca caawimada ee adiga iyo dadka ehelkaaga ahiba aad u baahan tiihiin. Nabadjelyadaada iyo tan gurigaabuba waa muhiim. Qof waliba wuxuu xaq u leeyahay nolol aan dagaal lahayn.

Telefoonada caawimaada ee waddanka oo dhan

Lambarka guud ee caawimaada (yleinen hätänumero) 112

Lambarka dhibaatada degdegga ah ee booliska 10022

Lambarka heeganka ee caawiya dadka dhibanayaasha ah 0600-16116

Lambarka heeganka ee caawiya dadka dhibanayaasha ah – la talinta xagga sharciga 0600-16117

Xarunta dhibaataysanayaasha la kufsaday ee Tukinainen 0800-97899

Khadka wax ma dilayaasha (Lyömätön Linja) 6126 6212

Waxqadyada Jussi iyo Ururka Guriga Ugu Horeeya iyo Guryaha Badbaadada, wax weydiinta (09) 454 2440

Lambarka risabshanka ee Ururka Ma dagaalamayaasha (09) 726 1600

Ururka Dhaqamada Kala Duduwan ee Monika (09) 4114 8700

Rugta caafimaadka ee degmadaada, xarunta la talinta qoyska ama xarunta ka wadahadalka arrimaha qoyska

HAL NABAR XITAA WAA SAA'ID!

Qoraalkan waxaa laga heli karaa cinwaanka internetka: www.vakivalta.net

Qoraalkan waxaa dejiyey:

Mashruuca ka hortagga dagaalka dumarka lagu sameeyo iyo dumarka lacagta loogu tago

Stakes, PL 220, 00531 Helsinki

Tel. (09) 39 671, faksi (09) 3967 2201